Jidka loo maro Codbixinta 1-2-3

Talaabada 1: Is-diiwaangali

- Cod-bixiyeyaasha ayaa horay isku diiwaangalin kara illaa Oktoober 15
- Ka eeg heerka is-diiwaangalintaada onlayn si aad u hubiso inaad diyaar u tahay codbixinta.
- Ogow markay tahay inaad dib isku-diiwaangaliso —haddaad guurtay, aad beddeshay magacaaga .
- Araajida is-diiwaangalinta codbixiyaha ayaa laaga heli karaa onlayn luqado badan si loo soo dejisto, daabacdo oo loogu soo diro xafiiska Xoghayaha Gobolka
- Waad is-diiwaangalin kartaa Maalinta Doorashada haddaad u baahto -sii wakhti dheeraad ah oo hubi inaad haysato aqoonsiga iyo macluumaadka cinwaanka loo baahan yahay,
- Aaladaha degelka ee la xiriira is-diiwaangalinta ayaa ku yaal: http://vote.minneapolismn.gov/voters/register

Tallaabo 2: Soo hel meesha aad ku codbixineyso



- Haddaad codbixineyso Maalinta Doorashada, waa inaad ku codbixisaa goobta codbixinta ee laguugu talagalay, iyada ku salysan cinwaanka -ka eeg onalayn helaha goobta codbixinta.
- Hadii ay kuu suurtagali weydo inaad timaad gobtaada codbixinta Doorashada, waxaad ku codbixin kartaa maqne ahaan.
- Ku codso codbixin maqane boostada adiga oo soo ka dejista onlayn oo dira codsiga codbixinta maqanaha, ama ku codbixin adiga oo taga Hoolka Magaalada (City Hall) laga bilaabo Sebtember 20.
- Waxaad kula socon kartaa onalayn heerka u marayo codbixinta maqanaha aad ku codsatay boostada.
- Aaladaha degelka ee la xiriira helitaanka goobtaada codsbixinta ayaa ku yaal: http://vote.minneapolismn.gov/voters/where-to-vote
- Aaladaha degelka la xiriira codbixinta maqanaha ayaa ku yaal:http://vote.minneapolismn.gov/voters/absentee

Tallaabada 3: Dhiibo codkaaga

- Soo buuxi codbixintaada maqane ama ku buuxi codbixintaada goobta doorashada
- Xusuusnow, Codbixinta Xulashada Darajeysan ayaa kuu saamaxaysa inaad kal darajeyso saddex musharrax xafiis kasta, markaa ku kala sareysii xulashooyinkaaga kowaad, labaad, iyo saddexaaad tiir kasta oo ka mid ah codbxinta
- Haddaad ugu baahato caawimo buuxinta codbixintaada waxaad haystaa kala doorasho - waxa ku codbixin kartaa maqane ahaan kahor Maalinta Doorasho, waxaad u soo kaxaysan kartaa qof doonto goobta doorashada si u kuu caawiyo, laba garsoore doorasho ayaa ku caawin akra, ama waxaad ku isticmaali kartaa goobtaada codbixintaada aaladda calaamadeysa codbixinta oo loo yaqaan Auto MARK ama markaad ku codbixineyso maqanaha adiga oo qof ahaan yimaad. Aaladda Auto MARK ayaa kuu akhriyi doonta adiga, oo kuu oggolaaneysa inaad muujiso xulashooyinkaaga, markaa kuu buuxin codbixintaada iyada oo raacaysa xulashooyinkaas.

MINNEAPOLIS

Magaaladaada. Codkaaga.

BISHA NOOFEMBAR 5-TEEDA

2013